JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| Sannadkii 11aad | Cadad Gaar ah | Tariikhda Daabacada 26/03/2022 |
|---|---|---|



# XEERKA GUDIDDA HAY'ADDA DHOWRIDDA TAYADA
# XEER LR.68/2014


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com



Sannadka 2022



Lama iibin karo
Not for sale

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

REF: JSL/M/XERM/249-3357/062015 DATE: 17/06/15

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0500/062015

## Dhaqan-galka Xeerka Guddida Hay'adda Dhawrista Tayada Xeer Lr. 68/2014

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-27/668/2015 ee ku taariikhaysan 26/06/2015 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Guddida Hay'adda Dhawrista Tayada Xeer Lr. 68/2014.

Wuxuu Soo Saaray

Dhaqan-galka Xeerka Guddida Hay'adda Dhawrista Tayada Xeer Lr. 68/2014.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Xafiiska Garayqaanka Guud ee Qaranka
Qoraalkan waxa laga diiwaangaliyay
Xafiiska Maanta 16/06/15
Lambarka: 74
Saxeex:

## Go'aanka Ansixinta Xeerka Gudidda Hay'adda Dhowrista Tayada

## Xeer lr. 68 /2014

**Markuu arkay:** Qodobka **77aad** iyo **122aad** ee Dastuurka JSL

**Markuu arkay:** Baahida wayn ee loo qabo in la ilaaliyo tayada alaabta, agabka iyo anfca si Bulshada Somaliland u noqoto mid caafimaad qabta oo ka amaan ah halisaha,

**Markuu xaqiiqsaday:** In si wayn loogu baahan yahay xeer lagu aasaaso hay'ad Qaranka ugu xilsaaran ilaalinta tayada

**Markuu dersay;** In dhibta ka haysata Somaliland maqnaanshaha xeer lagu maamulo dhawrista tayada,

**Markuu dhuuxay:** Talada iyo soo jeedimaha Hay'addaha uu khuseeeyso Sharcigani

**Markuu arkay:** Go'aanka ansixinta Xeer **LR: 70/2014** ee Golaha Guurtida SL kuna taariikhaysnaa **18/03/2015**

**Markuu arkay:** In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku samemeyen kuna ansixiyeen sodon iyo shan **(35)** cod **xeerka Guddida Hay'adda dhawrista Tayada**

**Markuu u Codeeyay:-** Ansixinta Xeerka Gudidda Hay'adda Dhowrista Tayada Kal-fadhigii **27aad** fadhigiisi **19aad** taariikhduna aheyd **05/5/2015** oo ay goob joog ahaayeen **(55)** Mudane oo ka mida ah mudanayaasha Golaha Wakiilada.

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah afartan iyo laba **(42 cod)** oo gacan taag ah ku ansixiyay Xeerka Gudidda Hay'ada Dhowrista Tayada (Xeer **No. 68/2014**), halka ay ka diiden sided **(8)** Mudane, afar **(4)** mudanena ka aamuseen, **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

## ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

## Jamhuuriyada Somaliland
## GOLAHA WAKIILADU

**Markuu arkay:-** Qodobka 122aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu arkay:-** Baahida wayn ee loo qabo in la ilaaliyo tayada alaabta, agabka iyo anfca si Bulshada Somaliland u noqoto mid caafimaad qabta oo ka amaan ah halisaha.

**Markuu xaqiiqsaday:-** In si wayn loogu baahan yahay xeer lagu aasaaso hay'ad Qaranka ugu xilsaaran ilaalinta tayada

**Markuu dersay:-** In dhibta ka haysata Somaliland maqnaanshaha xeer lagu maamulo dhawrista tayada,

**Markuu dhuuxay:-** Talada iyo soo jeedimaha Hay'adaha ay khuseeeyso

**Wuxuu Ansixiyay**

**Xeerka Gudida hay'adda Dhawrista Tayada**
**(Quality Control Commission Act)**

## QAYBTA KOWAAD
## TILMAAMAHA GUUD

### XUBINTA 1AAD

### Qododbka 1aad
### Erey-bixino

Hadii aan si kale nuxurku u sheegin, erayada waxa loola jeedaa:

| | |
|---|---|
| Tayo:- | Waxaa loola jeedaa waxtarka iyo fayo qabka shay ama badeecadaha. |
| Agabka:- | Waxaa loola jeedaa dhamaaan badeecadaha kala duwan ee yimaada dalka. |
| Anfaaci:- | Waxaa loola jeeda wax kasta oo la quuto. |
| Dhawrida: - | Waxaa loola jeedaa ilaalinta Heerka tayo wanaaga dhamaan Badeecadaha dalka Soo gelaya ama ka dhoofaya. |
| Guddi:- | Waxa loola jeedaa Gudida Hay'adda Dhawridda Tayada. |
| Fasiraad:- | Wixii aanu Xeerkani si cad u qeexin, waxaa loo fasirayaa si waafaqsan shareecada diinta islaamka, Dastuurka dalka iyo xeerarka kale ee la xidhiidha xeerkan iyo hadii loo baahdo Xeerarka Caalamiga ah. |
| Ogolaanshaha:- | Waxa loo la jeedaa ogolaanshaha ay Hay'addu aqoonsi rasmi ah ku siinayso shakhsiyadda qaanuuneed ee gudashada hawlgalka goob cayiman ee sugidda tayada. |
| Shahaadayn:- | Waxa loo la jeedaa qoraal dhinac saddexaad oo ku salaysan go'aamo ay la socdaan dib u eegista, wax soo saarkaas, habkaa iyo hannaanka ama shakhsiyaadka buuxiyay shuruudaha gaarka ah. |
| Xeerka lagu dhaqayo:- | Waxa loo la jeedaa shuruuc wada socota oo la xidhiidha tubta lagu dabaqayo, ama habka lagula qabatimayo isku xidhka dhismaha, rakibaada, baadhitaanka, muunadda, ama Aalad. |
| Dhoofin:- | Waxa loo la jeedaa tirade agabka loo qaadayo ama laga keenayo Somaliland. |
| Weel (container):- | Waxa loo la jeedaa gal ka samaysan biro oo lagu qaado alaabada si bed qabkooda loo sugo |
| Agab:- | Waxaa loola jeedaa shay kasta oo dalka yimaada oo u baahan in tayo |
| Komiishanka:- | Waxa loola jeedaa Xubnaha Komiishanka Dhowridda Tayada Somaliland mas'uulna ka ah dhamaan awoodaha uu xeerkani tilmaamayo. |
| Hay'ad:- | Waxa loo la jeedaa Hay'adda Dhowrista Tayada sida ku xusan qaybta 11. |
| Been abuurad:- | Waxa loo la jeedaa alaab kuwaas oo laga been sheegay asalkooda. |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

| | |
|---|---|
| Dhokumenti:- | Waxa loo la jeedaa xog kasta, xidhiidh kasta, ama xaqaa'iq kasta oo la kaydiyo. |
| Soo dejin:- | Waxa loo la jeedaa agab kasta oo dalka la keeno ujeeddo kasta ha loo keeno. |
| Kormeere:- | Waxa loo la jeedaa shaqaale ka tirsan Hay'adda oo qoraal ogolaansho ah ka sita Agaasimaha Guud, si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo, una dabaqaan qodobada xeerkan. |
| Baadhis:- | Waxa loo la jeedaa baadhitaanka agabka, habaynta ama rakibaadda iyo go'aaminta raacista shuruudahii gaarka ahaa ee laga rabay in ay raacday. |
| Joojin:- | Waxa loo la jeedaa diidmada ama ilaalinta agabka la soo dhoofiyo ee ku dhaca in uu buuxiyo heerar tayeedka iyo shuruucda looga baahan yahay. |
| Heer tayeedka caalamiga ah: | Waxa loo la jeedaa heer tayeedka kasta oo ka soo baxa ISO, IEC, FAO, iyo isu tagga heer. |
| Agaasimaha Guud:- | Waxa loola jeeda Agaasimaha Guud ee Hay'adda Dhowridda Tayada Jamhuuriyadda Somaliland oo ah Hay'adda uu xeerkani abuurayo. |
| Heer-tayeedka Qaranka:- | Waxa loo jeedaa heer tayeed kasta oo la soo saaray oo ku salaysan xeerka qodobkiisa 36. |
| Warshad:- | Waxa loo la jeedaa soo saaris, ururin, bedelid, habayn, keenid, rakibaad, tijaabo. |
| Soo saare:- | Waxa loo la jeedaa qof kasta oo leh sharciyad qaanuuneed oo isku xidha wax. |
| Calaamad:- | Waxa loo la jeedaa tub kasta, calaamad kasta, summad kasta, magac, saxeex, xaraf ama lambar, ama wax kasta oo kale oo isu tagay oo la xidhiidha calaamad. |
| Halbeegga HeerkaTayada:- | Waa habka lagu helayo Qiyaasta Heer Tayo, ee Badeecadda,anfaaci, qiimaheeda asalka ah tiro iyo Tayaba, taas oo suuragal ka dhigi karta mid Sugan oo sidaas lagu Dhaqmo.Noockastana waxuu yeelanayaa Hal-beeg Qiimeyeeyo Tayadiisa wax-Tarka leh. |
| Adeeg:- | Waxa loola jeedaa adeeg kasta oo caadiyan loo qabto bixin, iyo codsiga ashkhaasta ka faa'iidaysanaysa adeega. |
| Ogolaansho:- | Waa ogolaanshaha isticmaalka calaamada heer-tayeedka ee ku xusan xeerkan. |
| Dhisid:- | Waxa loo la jeedaa dhisme kasta ama hab kasta oo ay ku jiraan dhismayaasha |
| Wax soo saar:- | Waxa loo la jeedaa agab loo habeeyay in la suuq geeyo. |
| Qiimayn tayeed:- | Waxa loo la jeedaa wax-qabadyo isku xidhiidhsan oo lagu sugayo tayada, |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

| | |
|---|---|
| | diiradana lagu saarayo ku qanaca buuxinta tayada laga rabo. |
| **Iibin:-** | Waxaa loo la jeedaa Waa kala bedelasho is dhaafsi. |
| **Qeexnaan sugan:-** | Waxa loo la jeedaa caddaynta agabka, habaynta, ama tixraaca dabeecada adeega, xooganaanta tayada, waxyaabaha uu ka kooban yahay, tirada, cabbirka, miisaanka, heerka, waaridda, asalka, da'a da, ama astaamaha kale. |
| **Heer tayeedka:-** | Waxa looga jeedaa summad la xafiday oo lagu dabaqayo hannaanka caddaynta agabka ee tilmaamaya helitaanka kalsooni ku filan agabka ama adeegga. |
| **Marag furka shahaadada:-** | Waxa looga jeedaa shahaado ama ruqsad caddayn ah oo si rasmi ah loo bixiyay. |
| **WTO:-** | Waxa loola jeedaa Hay'adda Ganacsiga Aduunka. |

**Qodobka 2aad**

**Magaca Xeerka**

Xeerkan waxa loogu yeedhaya Xeerka Gudidda Hay'adda Dhowridda Tayada (Quality Control Commission Act).

**Qoddobka 3aad**

**Ujeeddo Xeerka**

Xeerkani waxa uu dhiiri galinaya daryeelidda heer tayeedka, cabbiraadda iyo sugidda kalsoonida agabka, adeegga iyo dhaqan galinta; si loo aasaaso Hay'adda Dhowrista Tayada Somaliland oo u taagan horumarinta, daryeelidda iyo dhiiri galinta heerarka tayo. Ogolaansho cadna u haysata shaqadeeda maamul iyo ilaalineed ee tirtiridda wax-soo saarka been abuurka ah ama tayadiisu liidato.

**Qodobka 4aad**

**Aasaasidda Guddida (Komishanka) Dhawridda Tayada**

1. Xeerkan waxaa lagu dhisay Gudida Dhawridda Tayada oo ah hay'ad qaran oo leh shakhsiyad qaanuuneed iyo shaambad u gaar ah, una madaxbanaan maamul ahaan iyo dhaqaale ahaanba.
2. Xarunta Guddidu waa caasimadda JSL ee Hargeisa, xafiisyona way ka furan kartaa gobolada iyo degmooyinka Dalka.
3. Guddiga (Komishanku) waxaay yeelanaysaa astaan u gaar ah oo ay go'aan ku soo saaraan.

**Qodobka 5aad**

**Magac dhawga komishanka**

Magac dhawga komishanku waxa uu noqonayaa Hay'adda Dhowridda Tayada Somaliland (Somaliland Quality Control Commission).

**Qodobka 6aad**

**Astaanta Hay'adda**

Astaanta Hay'adda Dhowridda Tayada Somaliland waxay noqon doontaa Geedka Gallayda, oo ay la socoto laambad iyo calaamadda sax ( √ ) iyo magaca hay'adda oo English iyo Somali ah oo ay la socoto astaanta qaranku.

## Qodobk 7aad
## Mabaadii'da Guud

Ujeedooyinka Gudida loo aasaay waa:

1. In la baadho lana hubiyo badeecadaha xambaarsan khataro iyo haliso waxyeelo u geysan kara Dadka Somaliland.
2. In la dejiyo halbeegyo lana hubiyo inaan laga hoosayn halbeegyadaas
3. In la xaqiijiyo in si buuxda loo hubiyo tayada dhamaan wixii dadku isticmaalo
4. In la cadeeyo digniinaha luqadaha qalaad ee ku suntan agabka iyo anfaaciga iyo dhamaan badeecadaha keeni kara haliso caafimaad, dhaawac iyo dhimashooyinba.
5. In dadweynaha laga ilaaliyo halisaha la xidhiidha badeecadaha.
6. Tayaynta, abuurida iyo kor u qaadida heerka caafimaad ee wax-soo saarka wershadaha dalka iyo alaabooyinka soo dega, xoolaha iyo beeraha si loo ilaaliyo caafimaad ahaan iyo dhaqaale ahaanba shacabka Reer Somaliland.
7. Xadaynta heer aanay ka hoosayn Karin adeega iyo alaabooyinka soo degaya (standardizations).
8. Hubinta iyo gaadhsiinta baayacmushtarka heerka loo xadeeyey iyo fulinta sharciga loo dejiyo.
9. Talo-siinta macaamiisha, shacabka iyo qiimaynta badeecadaha dalka soo gala, kuwa dhoofaya iyo kuwa ka soo baxa wershadaha dalka iyo beeraha.
10. U kuur-gelida in baadhitaan lagu sameeyo waxyeelooyinka ay sababaan alaabada dalka soo gala ama ka soo baxda warshada dalka.
11. Xaqiijinta iyo sugida fayoobida wax kasta oo dalka soo gelaya ama ka soo baxaya wershadaha dalka ama dalka debediisa loo dhoofinayo intaba.
12. Abuurida Shaybaadh qaran (National Laboratory System) oo lagaga baxo dhibaatooyinka caafimaad ee dalka iyo dadka haysta.

## XUBINTA 2AAD

## Qodobka 8aad
## Qaab-dhismeedka Gudida

1. Qaab-dhismeedka Gudidda Hay'adda Dhawridda Tayadu wuxuu ka kooban tahay:
   - b. Guddida Hay'adda,
   - t. Gudoomiye
   - j. Gudoomiye-xgeen
   - x. Agaasimaha Guud
   - Kh. Xafiisyada gobolada iyo degmooyinka.

## Qodobka 9aad
## Magacaabista iyo Dhismaha Guddida

1. Guddida waxa magacaabaya Madaxweynaha, waxayna ka koobnaanaysaa todoba xubnood oo saddex yihiin Rayid Madaxweynuhu soo xulayo iyo afar xubnood oo ay soo sharaxayaan Wasaaradaha Ganacsiga, Xannaanada Xoolaha, Caafimaadka iyo Beeruhu.
2. Muddo xileedka Guddidu waa 5 sanno oo ka bilaabanta maalinta uu ansixiyo Golaha Wakiilladu, dhaarta rasmiga ah ee Qarankana la mariyo, waxaana dib loo magacaabi karaa muddo xileed kale.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR ... OFFICE

## Qodobka 10[aad]
## Xilka iyo Waajibaadka Guddida

Xilka iyo waajibaadka Guddidu waa:

1. Dejinta siyaasada Guud iyo istiraatiijiyadooda shaqo.
2. Ansixinta iyo meelmarinta qorshaha Guddidu u aragto lagama maarmaan iyo hanaanka uu u shaqeeynayo.
3. Ansixinta misaaniyad sanadeedka hay'adda.
4. Ogolaanshaha baahida dalabka shaqaalaha.
5. Ansixinta xeer hoosaadka Gudida
6. Ansixinta heshiisyada iyo mucaahadooyinka ay hay'addu u aragto inay lagama maarmaan u yihiin howsheeda ee lala gelayo dhinacyo kale guda iyo dibadba.

## Qodobka 11[aad]
## Awoodaha Guddida (Komishanka)

Gudidu si ay u fuliso xilka iyo waajibaadka saaran waxay awood u leedahay inay: -

1. Baadho dhamaan anfaca, agabka, alaabta iyo ashyaada soo gelaya dalka ama lagu sameeyo dalka gudihiisa.
2. Soo saarto go'aamo ay ku joojinayso isticmaalka alaab ama agab, ama lagu xidhayo goob ganacsi.
3. Gasho goobaha ganacsi ee ay taalo alaabta ay baadhay Gudidu kadib marka ay si haboon u ogaysiiso mulkiilaha ama cida haysta goobta ganacsi.
4. Bixiso shahaadada tayo dhowrka.
5. U soo jeediso hay'dda ay khuseyso in lagala noqdo ruqsad ganacsi ganacsadihii ka hooseeya halbeegga tayo dhowrista.
6. Ay u gudbiso laamaha sharci fulinta cidii ay u aragto inay ku geftay xeer.
7. Go'aanka Gudida ee ku xusan farqadda 2aad ee qodobkan ama go'aankii kale ee ay soo saarto Gudidu waxa looga rafcaan qadan karaa Maxkamadda Sare.
8. Soo saarista Xeer-nidaamiyayaal, hagayaal iyo habraacyo.
9. Qaado talaaboyin kasta oo ay ku xaqiijinayso ujeedoyinkeeda iyada oo dhawraysa Xeerka.
10. Hawlgelinta iyo qaadashada shaqaalaha lagama marman ka u ah xil gudashadeeda iyada oo xeerka la dhawrayo.

## Qodobka 12[aad]
## Shuruudaha xubinimada Guddida Hay'adda

Qof kasta oo loo magacaabayo xubin gudida ah waa inuu:

1. Yahay muwaadin reer Somaliland ah.
2. Leeyahay aqoon heer jaaamacadeed ah.
3. Ku sifoobay akhlaaq iyo dadnimo wanaagsan.
4. Leeyahay khibrad shaqo oo aan ka yarayn 5 sano.
5. Aan Maxkamad horteed kaga dhicin xukun ciqaabeed saddexdii sano ee u danbeeyay.
6. Waa in uu maskax ahaan iyo jidh ahaanba u caafimaad qabaa.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 13aad

## Bannaanaanshaha Xubinimada iyo xilka Agaasimaha Guud

Xubin kasta oo Gudida dhowrista tayada ka mid ahi waa ay luminaysaa xubinimadeeda hadii ay:

1. Lumiso mid ka mid ah shuruudihii lagu soo xulay markii la magacaabayay.
2. Geeri ku timaado ama ay haleesho caafimaad darro aan u saamixi Karin gudashada xilka, oo ay caddeeyeen guddi dhakhaatiira oo u diwaan gashan wasaaradda caafimaadka.
3. Is casilaad qoraala u gudbiyo/soo gudbiso Madaxweynaha JSL, ogaysiina siiso Guddoomiyaha Guddiga.
4. Si rasmi ah looga qaado xilka xubinimada Guddiga Dhowrista Tayada agabka.

Xilka Agaasimaha fulinta wuxuu ku banaanaan karaa:

b. Geeri.
t. Is casilaad.
j. Caafimaad daro keenta xil gudasho la'aan.
x. Madaxwaynaha oo xilka ka qaada.

## Qodobka 14aad

## Dhaarta Xubnaha

1. Xubnaha guddiga waxa la marin doonaa dhaarta sharciga ah waxaana dhaarin doona guddoomiyaha maxkamadda sare iyada oo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland goob joog yahay.
2. Dhaarta xubnaha Guddiga Dhowridda Tayadu waxay noqonaysaa dhaarta ku xusan Qoddobka **129aad** ee Dastuurka **J.S.L.**

## Qodobka 15aad

## Guddoomiyaha Guddida

1. Guddidu waxay yeelanaysaa Gudoomiye, iyo ku-xigeen uu soo magacaabo Madaxwaynuhu.
2. Shuruudaha magacaabista Guddoomiyaha waxa loo raacayaa qodobka 11aad
3. Haddii ay bannaanaato jagada Guddoomiyaha waxa xilka sii haynaya Gudomiye-ku xigeenka inta Madaxwaynuhu soo magacaabayo Guddoomiye cusub.

## Qodobka 16aad

## Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha

Guddoomiyaha Guddidu waxa uu leeyahay xilkan iyo waajibaadkan soo socda:

1. Waxa uu gudoominayaa shirarka Guddida.
2. Waxa uu metelaa kuna hadlaa magaca Guddida.
3. Hagidda iyo maamulidda dhamaan howlaha hay'addu u xil saran tahay.
4. Wuxuu dalbanayaa shaqaalaha iyo hawl-wadeenada Guddida ka dib marka ay ansixiso Guddidu.
5. Magacaabista madaxda xafiisyada Gobollada ee guddiga.
6. Soo jeedinta miisaaniyada komishanka.
7. Saxeexa heshiisyada la xidhiidha hawlaha Guddida.
8. Saxeexidda qoraalada rasmi ahaan uga baxa Guddida.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

9. Ku kor joogtaynta Agaasimaha Fulinta iyo hawlqabadkiisa.

## Qodobka 17aad
## Guddoomiye Ku-xigeenka.

Xilka iyo waajibaadka Guddoomiye ku-xigeenku waa:

1. Gudashada xilka Guddoomiyaha Guddida mar kasta oo uu guddoomiyuhu maqan yahay iyo marka ay bannaanaato jagada gudoomiyaha guddidu.
2. Gudoomiye ku-xigeenku waxa uu qabanayaa hawshii kale ee uu u xilsaaro Gudoomiyuhu.

## Qodobka 18aad
## Agaasimaha Guud ee Guddida

1. Agaasimaha Guud ee Guddida waxa magacaabaya Madaxwaynaha JSL.
2. Qofka loo magacaabayo Agaasimaha fulinta waa inuu: -
    - b. Yahay muwaadin u dhashay Somaliland oo degan dalka.
    - t. Leeyahay ugu yaraan aqoon heer jaamacadeed.
    - j. Leeyahay waayo'aragnimo uu kasbaday ugu yaraan muddo Shan (5) sano ah hogaaminta iyo maamulka hay'adaha madaxa-banaan ama ururada aan dawliga ahayn.
    - x. Yahay qof ku sifoobay akhlaaq wanaagsan.
    - Kh. Leeyahay karti iyo hufnan shaqo.

## Qodobka 19aad
## Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud

Agaasimaha Guud ee Guddiga Dhowrista Tayada Somaliland waxa uu leeyahay xilka iyo waajibaadkan:

1. Gudashada hawlmaalmeedka Guddida Dhowrista Tayada Agabka Somaliland
2. Hawlgelinta shaqaalaha xafiisyada Gudida iyo ku kormeeridda howl-maalmeedkooda.
3. Isku-xidhka hawlaha xafiisyada Guddiga xarun gobol ilaa degmo.
4. Qaadidda hadal-qoraalada fadhiyada Guddiga iyo kaydintooda
5. Soo diyaarinta war-bixinaha hawl-qabad ee xafiisyada guddiga ee xiliyaysan sida (Bile, saddex biloodle iyo sanadle).
6. Dhaqan galinta iyo fulinta awaamiirta iyo go'aamada ka soo baxa guddiga.
7. Raacidda tilmaamaha guddoomiyaha Guddiga Dhowrista Tayada Agabka.

## Qodobka 20aad
## Fadhiyada Guddida

1. Guddidu waxa ay yeelanayaan fadhiyo caadiya iyo kuwo aan caadi ahayn.
2. Shirarka caadiga ah ee Guddida (Komishanka) waxay qabsoomayaan saddexdii biloodba hal mar.
3. Gudoomiyaha Guddida waa in uu gaadhsiiyaa muddada qabsoomida shirka todoba cisho ka hor xubnaha Gudida maalinta qabsoomidda fadhiga.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

4. Fadhiga Gudidu waxa uu ku qabsoomayaa marka ay joogaan kala badh iyo hal xubnaha Gudida (haldheeri).
5. Guddidu waxay yeelan kartaa fadhiyo aan caadi ahayn hadii uu isugu yeedho Gudoomiyaha ama 3 ka mida xubnaha Gudida ay qoraal ugu soo gudbiyaan guddoomiyaha guddiga.
6. Go'aanada Guddida waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah hadii tirada codadku isleekaado Gudoomiyaha ayaa leh cod dheeraad ah (casting vote).
7. Agaasimaha guud ayaa u xilsaaran qaadida qoraalka (minutes) shirarka Guddida.

### Qodobka 21aad
### Warbixinaha Guddiga

1. Gudidi waxay sannad kasta dhammaadkiisa soo saarayaa warbixin faah-faahsan oo ay gudbinaysaa Madaxwaynaha. Warbixintaasi waa inay koobsataa dhamaan waxyaabaha u qabsoomay iyo qiimaynta inta horumar laga gaadhay qorshayaashii la ansaxiyey.
2. Waxay Madaxwaynaha Gudidu u gudbinaysaa warbixin mar kasta oo kale oo uu soo dalbado

## XUBINTA 3AAD
## MAALIYADDA IYO XISAABAADKA HAY'ADDA
### Qodobka 22aad
### Maaliyadda Guddiga Dhawridda Tayada

Maaliyadda Guddiga Dhawridda waxa ay ka imanaysaa qadarka looga qoondeeyey Miisaaniyadda Dawladda iyo Deeqaha ay hesho.

### Qodobka 23aad
### Xisaabaadka Guddiga Dhawridda Tayada

1) Guddiga Dhawridda Tayadu waxa uu joogtayn doonaa oo uu si sugan u diiwaangelin doonaa dhammaan dhaqdhaqaaqa xisaabaha soo gala, hawlaha lagu qabtay iyo hantida, agabka ama saabaanka Guddiga.
2) Xisaabaadka Guddiga waxa si sannadle ah u baadhi doonaa hantidhawrka Qaranka.

## QAYBTA LABAAD
## XUBINTA 1AAD
## HEER TAYEEDYADA
### Qodobka 24aad
### Ujeedada Dhawridda Tayada

(1) Dhawridda Tayada waxa u bartilmaameed ah:
   b. Caddaynta in agabka adeeggu waafaqsan yihiin shuruucda u taalla;
   t. In ganacsatada laga gacan siiyo sidii ay u xulan lahaayeen agab iyo adeeg waafaqsan xeerarka;
   j. Kor-u-qaadidda tartan-galka tayaysan ee agabka iyo adeegyada heer qaran iyo heer caalamiba;
   x. Abuuridda jawi ay si xor ah agabka iyo adeegyadu isaga gudbi karaan Somaliland iyo suuqyada caalamiga ahba.

## Qodobka 25[aad]

## Rasmiyaynta ama Baahinta Heer-Tayeed

1) Guddigu waxa uu ku baahin doonaa Faafinta Rasmiga ah heer-tayeed loo asteeyey agab, wax-soo-saar, wershadayn, wax-soo-saar socda, ama qaabayn, tayo agab, rakibaad, dhismo, tijaabin, hawlgal, adeegsi agab ama Aalad laga istimaali doonno Somaliland.
2) Guddigu waxa uu wax-ka-beddel ku samayn karaa ama uu meeshaba ka saari karaa heer-tayeed (hore loo faafiyey).
3) Guddigu, ka hor inta aanu si rasmi ah u baahin, waxa uu hubin doonaa in heer-tayeed la dhaqangelinayo ama wax laga bedelayaa waafaqsan yahay tilmaamaha qaranka uga yaallaa samaynta iyo astaynta tilmaamaha heer-tayeedyada rasmiga ah ee uu oggol yahay Guddida Dhawridda Tayada; iyo in tixgelintooda la mariyey wax-soo-saarayaasha, qaybiyeyaasha agabka iyo macaamiisha isticmaali doonta agabkaas ama shaygaas.

## Qodobka 26[aad]

## Astaamaynta Heerarka

1) Hay'addu waxay si rasmi ah ugu baahinaysaa Faafinta rasmiga ah ee qaranka astaamaha heer tayeedka, waanay baddeli kartaa.

2) Astaamaha heer tayeedku waxa ay ka baadi-soocayaan agabka iyo dhaqangalka hawl-socod ee waafaqsan sharciga kuwa aan waafaqsanayn.

3) Guddiga Dhawridda Tayadu waxa ay u oggolaan kartaa, iyada oo shuruudaha ku habboon ku ladhaysa, in qof/shirkad isticmaasho astaamaynta heer-tayeedka, haddiiba agabkaasi si buuxda u waafqsan yahay tilmaamaha sharciyeed ee u yaalla.

4) Codsi ah in la aisticmaalo astaamaynta waxa loogu soo gudbinayaa Guddiga Dhawridda Tayada qoraal, iyada oo codsaduhu soo raacinayo tafaasiisha agabka ama hab-dhaqanka uu u doonayo astaamaha;

5) Qofnaba ma codsan karo astaamaha heer tayeedka ee ku xusan qaybtan marka laga reebo agab kasta oo ogolaansho ka haysta Hay'adda Dhowridda Tayada iyo agabka fuliya heer tayeedka Somaliland.

6) Qof kasta oo:

   b. Soo codsada astaanta heer tayeedka galka agabka ama astaan kasta oo lagu dhajiyo agabka.

   t. Ku dul sameeya ama ku wareejiya qafas ama weel, uu ku dhex jiro agab, ay ka muuqdaan astaamaha heer-tayeed, ama weel ama qafas si uun loogu muujiyey astaamaha heer-tayeedka;

   j. Waxa loo aqoonsan doonaa in si buuxda loogu dhaqangeliyey astaamaynta heer-tayeedka agabka lagu muujiyey.

7) Guddiga Dhawridda Tayadu marka uu ku qanco in sitaha oggolaanshuhu: -

   b. Aanu buuxin shuruudaha lagu tilmaamay Xeerkan.

   t. Aanu soo saarin ama keenin agabkii oggolaanshuhu ku salaysnaa ee waafqsanaa astaamaynta iyo heer-tayeedka Somaliland ee loo asteeyey.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

j. Joojiyey soosaaridda ama soodejinta agabka Oggolaanshuhu ku salaysnaa,

x. Waxa uu joojin doonaa, ama hakin doonaa hawl-socodka ama dhaqangelinta oggolaanshaha muddo aan ka badnayn hal sanno, sida uu Guddiga Dhawridda Tayadu hadba u garto.

8) Qodobbada uu xeerkani koobsanayo waxa ay xoojinayaan, oo aanay marnaba hoos u dhigayn, awoodda lagu maxkamadayn karo darjiidh lagu sameeyey ama dembi laga galay agabka iyo adeegyada loo cuskanayo. Haddii lagu qanci waayo go'aanka Guddiga Dhawridda Tayadu, waxa loo gudbin karaa maxkamadaha ku habboon.

## XUBINTA 2AAD

### Qodobka 27[aad]

### Diiwaanka Heer-Tayeedyada Somaliland

1) Guddiga Dhawridda Tayadu waxa uu samayn doonaa diiwaan ay ku dhan yihiin heerarka Tayada iyo wixii dukumenti ama sharciyo ah ee la xidhiidha.
2) Diiwaanku waxa u ahaan doona mid bulshadu ku heli karto qaabka ama qaababka (Daabacaadeed) uu u qoondeeyo Guddigu
3) Diiwaanka waxa ku jiri doona: -
   b. Cinwaanka iyo tirsiga heer-tayeedka ama wareegtada/sharciga la xidhiidha
   t. Soo-koobid tilmaamaysa inta uu koobsanayo heer-tayeedku ama xeerka/sharciga/wareegtada la xidhiidhaa.
4) Guddiga Dhawridda Tayadu waxa uu ku hayn donaa heer-tayeedyada hab-danabaysan (electronic) si loo ilaaliyo dhawrsoonaanta dukumentiga iyo sharcinimadooda.
5) Guddigu waxa uu awood u leeyahay inuu wax ka beddelo ama ka saaro heer-tayeed diiwaanka.

Ogeysiinta heer-tayeed cusub waxa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka

### Qodobka 28[aad]

### Ku-Dhawaaqidda, Faafinta iyo Hirgelinta Waajibka ah ee Heer-Tayeed

1) Guddiga Dhawrida Tayadu waxa u waajib kaga dhigi karaa dalka oo dhan heer-tayeed ama qaybo ka mid ah marka uu Guddigu u garto in waajibintaasi lagama maarmaan u tahay dhaqangelin sharciyeed ee farsamo
2) Marka uu Guddigu ku dhawaaqayo in heer-tayeed yahay mid waajib ah, waxa uu uga gol leeyahay:
   b. Ka-hortegidda dhaqannada ben-abuurka iyo khiyaamadu ku jirto
   t. Ilaalinta caafimaadka bini-aadamka iyo badbaadadiisa
   j. Badbaadinta nolosha iyo caafimaadka noolaha kale sida xayawaanka iyo dhirta; iyo
   x. Ilaalinta deegaanka
3) Guddiga Dhawridda Tayadu waxa ay dib ula noqon kartaa heer-tayeed ay hore u waajibisey
4) Guddiga Dhawridda Tayadu waxa ay heer tayo ka dhigi doontaa waajib iyada oo hubineysa in:
   b. Mushkiladda la xallinayaa tahay mid sugan oo muuqata
   t. Soo-dhexgelidda dawladdu tahay mid lagama maarmaan ah;
   j. Si kale looga gun gaadhi Karin hadafka laga leeyahay heer-tayeedka iyada oo waajib aan laga leexleexan Karin laga dhigo mooyaane;
   x. Sharcigii la xidhiidhey dhaqangal yahay;
   Kh. Ogeysiin ku habboon oo hore loo gaadhsiiyey Hay'adda Ganacsiga Caalamiga ah (WTO);
5) Ogeysiinta ama ku-dhawaaqidda heer- tayeed loogaga dhigayo mid waajib ah waxa lagu soo saaraya ama lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka iyo ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada heer



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

qaran ee dalka, iyada oo si cad loogu caddaynayo inuu heer-tayeedkaasi yahay mid waajib ah iyo taariikhda uu dhaqangal noqonayo.

6) Ogeysiinta waa in laga helaa: -
   b. Magaca iyo lambarka/tirsiga heer-tayeedka
   t. Sababta looga dhigay heer-tayeed waajib ah
   j. Tilmaanta muujinaysa meesha laga heli karo ama laga dheehan karo diwaanka tafaasiisha dhammaystiran leh ee Guddiga Dhawridda Tayada;
   x. Marjaca ama tilmaanta sharciyadda loo cuskaday waajib-ka-yeelista heer-tayeedka si waafaqsan xeerkan;
   Kh. Oggolaanshaha in ciddii diidan waajibinta heer-tayeedka ugu soo gudbin karto Guddiga Dhawridda Tayada diidmadeeda oo qoraal ah muddo soddon maalmood gudahood ah, iyada oo qaabka gudbinta loogu faahfaahin doono ogeysiinta.
7) Marka uu go'aanka ku-dhawaaqidda Waajibinta heer-tayeed qaato, Guddiga Dhawridda Tayadu waxa uu ku daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah.
8) Ogeysiinta lagu baahinayo Faafinta Rasmiga ah, waa in laga helaa: -

   b. Magaca iyo tirsiga heer-tayeedka waajibka laga dhigay.
   t. Wakhtiga loo qoondeeyey inuu noqdo dhaqangal.

## Qodobka 29aad
## Dhawrsoonaanta Sharci ee Dukumentiga Guddiga Dhawrida Tayada

1. Heerarka Tayo ee Somaliland waxa ay sharci ahaan u dhawrsoon yihiin Guddiga Dhawridda Tayada
2. Qofna ma daabici karo, dib uma faafin karo, ma kaydin karo, mana baahin karo heer-tayeedyada Somaliland iyada oo aan oggolaansho rasmi ah laga helin Guddiga Dhawridda Tayada marka laga reebo in qofku si gaar ah ama cilmi-baadhis u adeegsanayo.

## Qodobka 30aad
## Heer-tayeedyada iska hor-imanaya iyo sharciyada farsamo

1) Haddii ay iska hor yimaaddaan tafaasiisha heer-tayeed iyo sharci farsamo, waxa la raacaya sharciga farsamo ee ka horreeyey ee si waafi ah u qeexaya khataraha ku gedaaman dhaqangelinta heer-tayeedka.
2) Haddii iska hor imaad ka dhex muuqdo heer-tayeed waajib laga yeelay oo Xeerkan waafaqsan iyo sharci kale oo si caadi uga dhigaya mid aan waajib ahayn, waxa la raacaya sharcigan adkaynaya waajibintiisa.

# XUBINTA 3AAD
# CABIRAADA
## Qodobka 31aad
## Ujeedada Cabbiraadda

Ujeedada Cabbiraadda/Cabbirka laga leeyahay waxa ka mid ah:-

1. In la hubiyo is-waafajinta raadraaca cabbiraadeed ee qaranka iyo unugyada cabbiraadeed ee caalamku isticmaalo (international system of units).

2. Inay noqoto cabbiraadda qaranku ka tilmaan qaato, isla markaana xidhiidhisa habka cabbiraadeed ee caalamka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. In la xoojiyo, korna loo qaado habka cabbiraadeed ee heer qaran ee taageeraya ama waxtarka u leh qorshaha horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada ee qaranka, lana jaanqaadsan hababka iyo dhaqannada caalamku isticmaalo.

4. In la hubiyo kalsoonida lagu qabi karo cabbiraadaha ee dhinaca ganacsiga, wershadaha, caafimaadka, nabadgelyada, ilaalinta deegaanka iyo dhaqangelinta sharciga si waxtar looga geysto horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada iyo ilaalinta danaha/rabitaanka macaamiisha.

5. In la dhiirrigeliyo cilmibaadhista iyo horumarintaa cabbiraadda si loo kordhiyo fursadaha hay'aduhu ka heli karaan ama ka qaadan karaan isu-warwareejinta tiknoolajiga iyaga oo adeegsanaya cabbiraadaha.

## Qodobka 32aad
## Mabaadii'da Cabbiraadaha

Barnaamijyada cabbiraadaha iyo hawlaha la xidhiidha waxa lagu hirgelinayaa iyaga oo ku qotoma mabaadii'da hoos ka muuqda: -

b. Cabbiraado hore loo adeegsaday oo tijaabo baxay.

T. In lagu gaadhi karo qiyaaso tayo leh oo kharajkooda iyo adeeggooda cabbiraadeed la maarayn karo.

j. In lagu gaadhi karo, oo aanay kala go'nayn, cabbiraadaha la midka ah ee heer caalami iyo wararka ama macluumaadka la xidhiidha.

# XUBINTA 4AAD
# BAADHAYAASHA

## Qodobka 33aad
## Magacaabidda Baadhayaasha

1) Guddoomiyaha guddiga, waxa uu magaaci doonaa tiro baadhayaal ah oo Guddigu waafaqsan yahay si loo fuliyo Xeerkan, isaga oo qoraal ku siin doonaa xil-u-magacaabista loogu igmaday hawlaha la xidhiidha Xeerkan;
2) Sarkaalka Baadhe loo magacaabaa: -

   b. Waxa uu xilkaa kula wareegi doonaa shuruudaha iyo tilmaamaha shaqo ee uu siiyo Guddiga Dhawridda tayadu

   t. Waxa uu ku hawlgeli doonaa awoodaha uu siiyo Xeerkani;
3) Guddoomiyuhu waxa uu la noqon karaa magacaabid baadhe ama badhayaal lagu igmaday si waafaqsan qaybtan Xeerka.
4) Magacaabidda baadhayasha waxa lagu baahin doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

## Qodobka 34aad
## Waajibaadka Baadhayaasha

1) Inta ay baadhayaashu xilgudashadooda uu oggol yahay Xeerkani, qaybtiisa 29, waxa ay: -

   b. Ay tusayaan dadka hawshu soo gashay dukumentiga aqoonsigooda caddaynaya mas'uuliyadooda.

   t. Ogeysiinayaa mas'uulka goobta agabka ama walxaha laga qaaday goobta iyo sababta loo qaaday, iyaga oo haddii laga codsado bixinaya risiidh caddaynaya agabka goobta laga qaaday.

   j. Ogeysiis qoraal ku siinayaan mulkiilaha wixii agab ah ee laga qaaday goobtiisa maqnaanshihiisa.
2) Baadhuhu waa in uu goobjoog ahaadaa marka weel afka ka xidhan oo lingaxan laga jarayao qafaska.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

## Qodobka 35[aad]

## Awoodaha Baadhayaasha

1) Baadhe lagu magacaabay si waafqsan sharciagn waxa uu u gudanayaa hawlihiisa baadhiseed sida uu u tilmaamo Guddiga Dhawridda Tayadu, waxana uu, gaar ahaan, hubinayaa in agabka, hawlgallada iyo badeecaduhu waafaqsan yihiin heer-tayeedyada, cabbiraadaha iyo sharciyada farsamo ee loo dejiyey, iyaga oo baadhaya wixii ama khidmad ah ee la xidhiidhey.
2) Si loo fuliyo Xeerkan, Qof baadhe ahi: -

   b. Waxa uu, iyada oo uu haysto sababayn ku filan, baadhis u geli karaa goob loo tuhunsan yahay in lagu wershadaynayo, lagu soo saarayo, lagu habaynayo agab – amaba lagu samayn karo intaas oo dhan, amaba loogu kaydinayey si looga ganacsado qaab aan sharciga waafaqsanayn.
   t. Waxa uu baadhi karaa, muunadna ka qaadi karaa walax kasta oo loo tuhmo in lagu wershadayn karo, lagu badin karo, lagu qaabayn ama habayn karo agab, iyada oo uu awood u leeyahay in loo furo goobtaas ama walxaha dhexyaalla ee loo isticmaali karo hawlaha tuhunka keenay.
   j. Waxa uu baadhi karaa oo qoraallo ka samaysan karaa qaabayn, wershadayn, ama samayn agab oo socota.
   x. Waxa uu baadhi karaa hawlgal ama hawlfulin isla goobtaas ka socota oo la xidhiidha ama lala xidhiidhin karo tuhunka baadhistu ku salaysan tahay.
   Kh. Waxa uu qaadi karaa tallaabada ku habboon ee lagu joojinayo wershadaynta, soosaaridda, qaabaynta, iwm. Agabka ee sharciga baalmarsan ee aan waafaqsanayn heer-tayeedyada waajibka ah ee qaranka iyo shuruucda farsamo ee la xidhiidha, si aan badeecadda noocaas ahi u gelin suuqa.
   d. Waxa uu ka dalbi karaa qofkii ay soo gasho hawshu inuu soo saaro ama keeno wixii xog diwaan/qoraal ah ee la xidhiidha hawlgalku badeecadda ama agabka ama qaabaynta uu ku wajahan yahay.
   r. Waxa uu baadhi karaa oo nuqul ama sawir ka qaadan karaa diwaan/qoraal uu u arko inuu wax ka tari karo ama ka iftiimin karo hawlgalka uu ku jiro, iyada oo uu isla mar ahaantaa wixii faahfaahin ah ka dalban karo mas'uulka goobta jooga oo uu ka qaadan karo wixii diwaanka xogta ah ee daruuri u ah baadhistiisa iyo go'aannadiisaba.
   s. Waxa uu xog dheeraad ah ka raadin karaa qof kasta oo uu u tuhmo inuu wax kaga soo kordhin karo baadhistaas oo ku sugan ama ka shaqeeyey goobta, ama qof kasta oo loo tuhmo inuu hayo agab ama walxo caddayn dheeraad ah u ah baadhista.
3) Baadhuhu: -
   b. Waxa uu gacanta ku dhigi karaa ama soo xerayn karaa, si loo soo baadho, badeecad ama agab kasta oo uu u tuhmo in fal garab marsan sharciga lagu galay;
   t. Waxa uu gacanta ku dhig karaa ama qaadi karaa agab iyo diwaanka/qoraalka uu baadhuhu u arko inay wax ka tari karaan marag-furka qaab, agab ama hab lala baalmaray sharciyadda ku cad Xeerkan.
4) Marka uu xil-gudashadiisa Xeerkani u oggol yahay gudagelayo waxa uu si cad ugu bandhigayaa aqoonsigiisa baadhenimo cidda mas'uulka ka ah goobta baadhistu soo gasho, isaga oo mas'uulkaasi ku martiqaadaya inuu la socdo inta uu xilkiisa goobtaas ka gudanayo.
5) Halka
   b. Goobta baadhitaanku soo galay aan lagu jirin; ama

   t. Mulkiilaha, ku-jiraha ama qofka ka mas'uulka ahi uu si ku-meel-gaadh ah uga maqan yahay; ama



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE

j. Gelitaanka goobta la isu diido ama caqabado la hor dhigo;

6) Baadhuhu waxa uu ku geli karaa goobta awood xoog loo adeegsado, iyada faqradaha (a) iyo (b) la tixgelinayo in:-

b. Dedaal iyo tallaabooyin ku habboon uu qaaday Baadhuhu inuu helo mulkiilaha, qofka ku jira ama mas'uulka goobta ka hor inta aanu adeegsan awooddiisa; iyo
t. Uu baadhuhu kaga tago goobta iyada oo ah sidii uu ugu yimi, oo ka xafidan tuugta iyo biliiqada.

### Qodobka 36aad

### Khidmadda Heer-Tayeedka

Soo-saarayaasha iyo soo-dejiyayaasha agabka iyo badeecaduhu waxa ay bixin doonaan khidmadda Heer-tayeedka, taasi oo ay wada-jir u go`aamin doonaan guddi uu Wasiirka Maaliyaddu ka magacaabo Wasaaradda & Guddiga Dhawrista Tayadda.

### Qodobka 37aad

### Siraha Ganacsi iyo Ilaalinta Sirta

1. Haddii aan sharcigan si waafaqsan loo adeegsanayn, ama mid kale oo u dhigma, ama iyada oo maxkamadi sidaa dalbato/amarto mooyaane, qofna ama sarkaalna kama war-sheekoon karo badeecad, hawlgal ama wax-soosaar uu kaga war helay inta uu ku dhex jiro xilgudashadiisa

2. Ka warbixinta badeecad, wax-soosaar ama hawlgal waafaqsan xeerkan, waxba uma dhimi karto in loo diiwaan geliyo si sharcigan ama kuwa kale ee u dhigma waafaqsan.

3. Iyada oo la dabbaqayo sharcigan/xeerkan ama kuwa kale ee u dhigma, haddii qof shaqaale ahi bixiyo war la xidhiidha agab ama badeecad ama wershadayn ama wax-soosaar una sheego badhe, uma qoolna loomana qabsan karo sharci ahaan si waafaqsan Qaybta 35, loo-shaqeeyaha ama mas'uulka qofkaa shaqaalaha ahi hoos tagaana kuma ciqaabi karo.

### Qodobka 38aad

### Been-abuurka

1) Ka-been-abuurka badeecaddu waa xaaraan;
2) Waa dembi in la soo dejiyo, la soo saaro, laga ganacsado badeecad been-abuur ah oo aan asal ahayn.
3) Xeerkani waxa uu sidooda u aqoonsanaan doonaa oo dhawri doonaa astaamaha, xuquuqda muuqaal ama qafas ama magac ee badeecadaha ee laga bixiyey dalka dibeddiisa, xataa haddii ayna hore uga diiwaan gashanayn Dalka.

## QAYBTA SADDEXAAD

## DEMBIYADA IYO CIQAABAHA

### Qodobka 39aad

### Dembiyada iyo Ciqaabaha

1. Qofka lagu helo inuu soo saaray si wershadaysan, soo dejiyey, qaybiyey, iibiyey ama si uun uga ganacsaday dalka Jamhuuriyadda Somaliland gudihiisa badeecad aan waafaqsanayn Heer-Tayeedka la waajibiyey ee Xeerkani jidaynayo, waxa uu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo aan ka yarayn 3% qiimaha badeecad la qabtay haduu danbigaasi u ekaado mid la caadastay waxa la iskugu darayaa ganaax, xadhig iyo liisanka ganacsi oo lagala noqon doonaa.

2. Qof kasta oo:

b. Is hor taaga ama ka carqaladeeya baadhe ku hawlgalaya waajibaadka xeerkani faray, Howshooda Qofkii wareysiga shaqadooda Khuseeya ay u arkaan inuu wax jira Qarinayo, waxaa uu is hor-taagay Shaqadii ay Qaranka u hayeen, waxayna u Gudbinayaan Qoraal Sababaysan oo is-hortaag Shaqo Qaran Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud, ka dibna Maxkamadda awoodda u leh hor-geynaya, si loogu abaal Mariyo Xadhig iyo Ganaax Kolba sida ay Maxkamaddu go`aamiso.

t. Ka gaabiya ama laga waayo xogta diwaanka la weydiiyey ama ka jawaabcelin waaya weydiimo loo jeediyey oo uu u baahday ama u baahdeen baadhayaasha ku qeexan xeerkan iyada oo aanay jirin sabab lagu gudbo oo xeerku oggol yahay, amaba bixiya warbixin ama jawaabo marin-habaabis ah oo runta ka fog;

j. Jebiya ama ka gaabiya inuu ku dhaqmo waajibaadka uu jidaynayo Xeerkani, ama tusaalayaal ama amarro la jaanqaadsan Xeerkan oo la bixiyey, oo ay ahayd in lagu dhaqmo;

3. Sida ku xusan farqada 2^aad ee qodobkan Waxa loo aqoonsanayaa inuu galay qofkaasi dembi u soo jiidaya ganaax aan ka badnayn laba Milyan oo Somaliland Shilling ah ama xadhig aan ka badnayn 5 sannadood ama labadaba.

4. Qof kasta oo:-

b. Adeegsada ama isticmaala astaamaha heer-tayeedka iyada oo aanu oggolaansho ka haysan Guddiga Dhawridda Tayada, ama ku xad gudubka shuruudaha lagu bixiyo ruqsadda ama oggolaanshaha.

t. Ka been-sheega af iyo qoraal mid kuu doonaba heer-tayeed uu isticmaalay isaga oo uga gol leh inuu ku sheego ama loo qaato inuu waafaqsan yahay heer-tayeed aan laga oggolaan oo uu ku tilmaamayo badeecad, wax-soo-saar, hawlgal, marka aanay dhabtu sidaa ahayn.

j. Si khiyaamo ah qoraal ama af u barbardhiga heer-tayeed u adeegsaday mid u yaalla Guddiga Dhawridda Tayada oo la xidhiidha badeeca ama soo-saarideeda, iwm. Isaga oo aan oggolaansho ka haysan Guddiga.

5. Qofkasta oo la yimaada waxyaabaha ku xusan farqada 4^aad ee qodobkan Waxa loo aqoonsanayaa inuu galay dembi aan xadhiggiisu ka badnayn 5 sannadood ama ganaax aan dhaafsanayn hal milyan oo Shilin Somaliland ah.

6. Baadhe isaga oo fulinayaa xilgudashadiisa uu waajibiyey Xeerkani:

b. Gacanta ku dhiga ama xanniba agab aan ahayn kan uu jideeyey xeerkan ama shuruuc kale oo ka dambaysa iyo tilmaamo la xidhiihda.

t. Lagu helo inuu hanti ka qaatay gudashada waajibkiisa ama abaalmarinno nooc kastaba ha ahaadeene, ballan qaada ama damaanad dhaqaale, oo ka baxsan tan sharcigu u oggol yahay.

j. La gala heshiis uu kaga gaabinayo gudashada waajibkiisa isaga oo qarinaya ama oggolaanaya in laga fakado ama la majara-habaabiyo qaybo ka mid ah Xeerkan ama habsami-u-fulinta waajibaadka baadhaha ee goobta.

x. Bixiya xog aanay ku waajibin gudashada waajibaadkiisa ama marag-fur maxkamadeed ama oggolaanshaha Agaasimaha Guud oo la xidhiidha shakhsiyaad ama shirkado;

Kh. U adeegsada xilkiisa iyo mas'uuliyaddiisa si uu hanti ugu urursado.

7. Sida ay xuseyso farqada 6^aad ee Qodobkani Waxa loo aqoonsan doonaa dembiile u qalma xadhig aan ka badnayn shan sannadood (5) ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn hal malyuun oo Shil Somaliland ah ama labadaba oo ay maxkamad garsoor soo saari doonto; iyada oo xukuumaddu la wareegi doonto wixii hanti ah ee lagu urursaday dembiga la galay hadduu yahay lacag, hanti ma-guuraan ah ama mid kaleba.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

8. Qof kasta oo isaga oo u badheedhaya khiyaamaynta Guddiga Dhawridda Tayada:

   b. Siiya si toos ah ama si dadban Baadhe gudanaya waajibaadkiisa abaalmarin dhaqaale ama mid kale, ama u ballan qaada intaba;
   t. La gala heshiis ama afgarad lagu daba-martaynayo Guddiga Dhawridda Tayada iyo shurrucda la hirgelinayo si loo qariyo xog jirta ama loo oggolaado waxa aan sharcigu bannayn oo ku liddi ah xil-gudashada baadhaha;

9. Qofkasta oo ku gafa Farqada 8aad ee sare ku xusan Waxa loo aqoonsanayaa oo lagu qaadayaa inuu galay dembi ciqaabtiisu aanay ka badnayn shan sannadood ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn hal malyuun oo Shilin Somaliland ah – ama labadaba.

10. Qof kasta oo xayaysiis agab ama badeecad oo uu kaga been-sheegayo daabaca, waxa loo aqoonsan doonaa qof galay dembi.

11. Qof kasta oo meshii lagu ogaa ka qaada, fogeeya ama iibiya, dib u dhoofiya, baab'iya ama wax ka bedela badeecad baadhis ku jirtey, ka hor inta aan go'aan ka soo bixin, waxa loo aqoonsanayaa dembiile.

12. Qofka lagu helo in uu galay dembi uu qeexay xeerkan, oo maxkamadi ku fulisey, ka sokow ciqaabta hore ee maxkamaddu saartay, waxa amar lagu bixin karaa.

   b. La-wareegidda agabka iyo badeecadda lagu galay dembiga, ama baabi'intiisa iyada oo wixii kharaj ah ee ay hawlgalku la yimaaddo la saarayo dembi-galaha.
   t. Mamnuucidda soo-saaridda ama iibinta agabka ama badeecadaha aan la jaanqaadsanayn heer-tayeedyada Somaliland, iyada oo maxkamaddu amri karto in qalabka, agabka, ama badeecaddaa ku xusan xaraf (a) loogu talin karo hadba sida lagu caddeeyo amarkaa.

## Qodobka 40aad
## Marag-furka Shahaadada

1. Shahaadad ama ruqsad caddayn ah oo rasmi ah oo hore loo bixiyey waa loo adeegsan karaa marag-fur maxkamadda horteeda ah oo la xidhiidha mawduuca ay ku salaysan tahay.

2. Shahaadad ama Caddayn lagu helay siyaabaha uu oggolyahay sharcigani looma adeegsan karo markhaati ahaan haddii aan: -

   b. Cidda marag fur ahaan loogu adeegsanayo aan nuqul loo sii hor marin muddo aan ka yarayn todoba maalmood ka hor dhegeysiga dacwadda.
   t. Qofka bixinaya shahaadada ama caddaynta ugu yaraan saddex maalmood ka hor maxkamadda la sii ogeysiin inuu ku yimaaddo Maxkamadda.

3. Si ay u fulaan waajibaadka sharciyadda qaybtani, caddayn ama shahaado sidaa loo hor keenay maxkamadda, waxa loo aqoonsanayaa sharcinimadeeda haddii aan la caddayn inaanay sidaa ku bannaanayn.

### Qodobka 41^aad

### Dabarka Dacwadaha

Xubnaha Guddida Shakhsi ahaan looma raacayo lumid ama khasaare kasta oo gaadhay dhinac saddexaad (Third Party) oo ka dhasha xil gudashadiisa, haddii lumid ama khasaarahaasi loo gelin si badheedh ah, taxadar la'aan ah ama khilaafid Xeerarka iyo talooyinka Mas'uuliyiinta.

## QAYBTA AFRAAD

## QODOBO KALA DUWAN

### Qodobka 42^aad

### Ilaalinta Dawladda, Guddiga Dhawridda Tayada iyo Hawlwadeenka

In la sheegto in badeecad ama agab uu waafaqsan yahay heer-tayeed qaran, ama sidaa lagu soo wershadeeyey ama in astaan heer-tayeed loogu adeegsaday badeecad si waafaqsan shuruucda, oo la caddeeyey in aanay dhab ahayn, uma qoolna, lagumana dacwayn karo dawladda, Guddiga Dhawridda Tayada, ama mid ama qayb ka mid ah shaqaalaheeda.

### Qodobka 43^aad

### Cayimidda Shaybaadh Qaran

1. Guddiga Dhawridda Tayadu waxa uu waajib sharci ah u leeyahay inuu cayimo ama magacaabo shaybaadh Qaran oo lagu baadho badeecadaha.

2. Guddiga Dhawridda Tayadu waxa uu qaadi doonaa kharash adeeg shaybaadh lagu socodsiiyo hawlmaalmeedka shaybaadhka qaran.

3. Guddoomiyaha Guddiga Dhawridda Tayadu waxa uu soo saari doonaa siyaasad lagu dhaqo kharashka adeeg shaybaadh.

4. Kharashka laga qaadayo adeegga shaybaadh waxa uu waafaqsanaan doonaa tilmaamaha heer maaliyadeedka qaranka Somaliland.

5. Shaybaadhada dalka ka hirgala waxa kormeer iyo dulmar ku leh Guddiga Dhawridda Tayada si ay ugu ilaaliyaan Tilmaamaha heer-tayeedyada Qaranka.

### Qodobka 44^aad

### Reebannaanta Ciqaabidda ama Dulmiga Shaqaalaha

1. Loo-shaqeeyuhu iskama eryi karo, mushaharkiisa/gunnadiisa ma dhimi karo iyo qodobbada ay ku qotomaan ee lagu meeleeyey isaga oo u soo dejinaya kuwa ka liita halkii at taagnaayeen; sidoo kalena hoos uma dhigi karo heerka mas'uuliyadeed ee uu hayo, ama uma beddeli karo mid ka liita iyada oo loo-shaqeeyuhu ku ciqaabayo hawlwadeenka tuhun uu ka qabo inuu ka war sheekooday shaqada ama uu xog siiyey Baadhe, isaga oo waajib qaran oo sharcigu ku jideeyey gudanaya.

2. Loo-shaqeeye fulin waaya sida uu dhigayo Xeerkan, qaybta 41 (1), waxa loo aqoonsanayaa inuu dembi galay

### Qodobka 45^aad

### Soo saarista Xeer-nidaamiyayaal

1. Guddoomiyuhu, isaga oo la kaashanaya Guddiga, waxa uu soo saari karaa Xeer-nidaamiyayaal lagu sii hagaajinayo habsami-u-socodka xilgudashada lagu tilmaamay Xeerkan.

2. Iyada oo aan waxba laga beddelayn sida guud ee faqrad 1 (sare) u dhigan tahay, waxa uu Guddoomiyuhu

   b. Qaabayn karaa foomamka loo adeegsan doono hawlgallada kala geddisan ee Xeerkani waajib yeelayo;
   t. U qiil dooni doonaa qaabka loo waajahayo ama looga go'aan qaadanayo rafcaannada ka soo ifbaxa dhaqangelinta hawlgallada Xeerkan;
   j. Qaabeeyo ama tilmaamo hawl kasta oo lagu meelmarinayo Xeerkan iyo dhabbaha uu u marayo Guddiga Dhawridda Tayadu hawlfulintiisa uu waajibiyey Xeerkani.

## Qododbka 46aad
## Tirtirid

Waxa halkan lagu tirtiray Xeer kasta oo ka soo jorjeeda Xeerkan

## Qododbka 47aad
## Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golayaasa Sharcidejintu Ansixiyaan oo uu Madaxwaynuhuna saxeexo, Faafinta Rasmiga ahna lagu soo saaro.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

______________________________

**C/raxmaan Maxamed C/laahi (Ciro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

______________________________

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE